Qofkii habeenka Laylatul Qadarka Salaatu Layl u istaaga isagoo rumaysan oo ajar doon ah waa loo dhaafaa dambigiisii hore

Abii Hureyra Allaha ka raali ahaade waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu yiri: Qofkii habeenka Laylatul Qadarka Salaatu Layl u istaaga isagoo rumaysan oo ajar doon ah waa loo dhaafaa dambigiisii hore.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu sheegay fadliga Habeenka Laylatul Qadrigu leeyahay, Habeen kaasoo ku jira tobanka u dambeeya Ramadaanka, Qofka Habeenkaa ku dadaala Salaada, ducada, akhrinta Qur'aanka, xuska Ilaahay, isagoo rumaysan Habeenkaa iyo fadligiisa, oo ka rajaynaya camalkiisaa in Ilaahay ajar ka siinaayo, ee aan ula jeedin is tustus iyo ha lugu maqlo, waxaa loo dhaafaa dambigiisii hore.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/4202